

Waxa aad Samayneyso haddii Interneetka Lagugu Dhaco



Somali



Baro wixii aad samayn lahayd haddii aad lacag siiso qof aad isleedahay wuxuu ahaa tuug, ama haddii aad siisay xog gaar kuu ah ama haddii uu isticmaalay taleefankaaga ama kumbuyuutarkaaga.

Tuugada ayaa aad kuugu qancin kara rabitaankooda. Way nasoo wacaan, waxay noosoo diraan iimayl, ama fariin qoraalo ah ayagoo iskudayaaya inay qaataan lacagteena iyo xogta gaarka ah ee xasaasiga ah — sida lambarka Soosiyaal Sikuurati ama lambarada koontada. Wayna yaqaanaan waxa ay samaynayaan. Halkaan waxaad ka helaysaa wixii aad samayn lahayd haddii aad lacag siiso qof aad isleedahay wuxuu ahaa tuug ama aad siisay xog gaar kuu ah ama haddii uu isticmaalay taleefankaaga ama kumbuyuutarkaaga. Haddii aad lacag siisay tuug, lacagtaada waa tagtay. Cadad kasta oo aad bixisayba, mar kasta waxaa habboon inaad waydiiso shirkada aad adeegsatay si aad u dirto lacagta haddi ay heli karaan qaab ay lacagta kuugusoo ceshaan.

Haddii aad Lacag U dirtay Tuug

Ma waxaad lacagta uga dirta kaarka deynta ama kaarka kaashka ee baanka?	La xariir shirkada ama baanka soo saartay kaarka daynta ama kaarka kaashka . U sheeg in lacagta lagaa khiyaanay. Ka codso inay soo celiyaan lacagtaada ayna kuu ceshaan lacagta.
Miyuu tuugu lacag sharci daro ah kala baxay baankaaga?	La xariir baankaga oo u sheeg in tuugu adeegsaday lacag dirista ama la bixida kaarka baanka oo sharci daro ah . Ka codso inay soo celiyaan lacagtaada ayna kuu ceshaan lacagta.
Miyaad lacagta ku bixisay kaarka hadiyada?	La xariir shirkada samaysay kaarka hadiyada . U sheeg in loo adeegsaday in lagugu xado oo waydii haddii ay soo celin karaan lacagtaada. Hayso kaarka hadiyada qudhiisa, iyo risiidka kaarka hadiyada.
Miyaad lacagta xawaalad ahaan ugu dirtay shirkad sida Western Union ama MoneyGram ah?	La xariir shirkada xawaalada ah . U sheeg inaad lacagta ku dirtay dabin khiyaano oo lagu dhigay. Ka codso inay soo celiyaan lacagtaada ayna kuu ceshaan lacagta. <ul style="list-style-type: none">• MoneyGram ka wac 1-800-955-7777• Western Union theo ka wac 1-800-448-1492• Ria (lacagaha aan lagu dirin-Walmart) ka wac 1-877-443-1399• Ria (lacagaha lagu diray Walmart2Walmart iyo Walmart2World) ka wac 1-855-355-2144
Miyaad lacagta xawaalada ku dirtay bankaaga?	La xariir bankaaga oo u sheeg in lacagtu ku baxday hab khiyaano ah. Ka codso inay soo celiyaan lacagtaada ayna kuu ceshaan lacagta.
Miyaad lacagta ku dirtay ablikeeshin lacagta lagu diro?	U sheeg lacagta khiyaanada lagu diray shirkada leh abka lacagta lagu diro oo ka codso haddii ay soo celin karaan lacagta aad dirtay. Haddii aad abka ku xirtay kaarka daynta ama kaarka baanka, u sheeg in lagu khiyaamay shirkadaada kaarka daynta ama bangiga. Ka codso inay soo celiyaan lacagta aad dirtay.

<p>Lacagta ma waxaad ku bixisay lacagaha dhigitaalka ah (cryptocurrency)?</p>	<p>Lacagaha kiribtada (Cryptocurrency) caadiyan lamasoo celin karo. Marka aad dirto lacag Cryptocurrency ah, waxaad keliya lacagtaada soo ceshan kartaa haddii qofka aad u dirtay uu soo celiyo. Laakiin la xariir shirkada aad u adeegsatay dirista lacagta una sheeg inaad lacagta ku dirtay qaab khiyaano ah. Ka codso inay lacagta soo ceshaan, haddii ay suurtagal tahay.</p>
<p>Ma waxaad dirtay lacag kaash ah?</p>	<p>Haddii aad kaash ahaan ugu dirtay boostada Maraykanka, la xariir Adeegga La socoshada Boostada ee Maraykanka ood ka wacayso 877-876-2455 kana codso inay qabtaan baakada lacagta lagu qaaday. Si aad xog badan uga ogaato hanaankaan, booqo Baakad Qabashada USPS: Aasaasiyaadka.</p> <p>Haddii aad adeegsatay adeeg kale oo lacagaha qaada, la xariir ayaga sida ugu dhakhsaha badan.</p>

Haddii aad Tuug Siisay Xogtaada Gaarka ah

<p>Miyaad siisay tuugo lambarkaaga Amniga Bulshada (Social Security)?</p>	<p>Booqo barta IdentityTheft.gov si aad u ogaato talaabooyinka aad qaadi karto, ayna ku jiraan sida aad ula soconayso dayntaada.</p>
<p>Miyaad siisay tuuga ciwaankaaga iyo baasweerkaaga?</p>	<p>Samayso baasweer cusub, oo xoog badan. Haddii aad isla baasweerka ku isticmaasho meel kale, halkaasna ka badal, sidoo kale.</p>

Haddii tuugu Galay Kumbuyuutarkaaga ama Taleefanka

<p>Tuugu rimuud miyuu ka hagayaa kumbuyuutarkaaga?</p>	<p>Wax ka badal softweerka amaanka kumbuyuutarkaaga, iskaan garee, oo tirtir wax kasta oo sofweerku u aqoonsado dhibaato. Kadibna qaad tallaabooyin kale si aad u difaacdo xogtaada gaarka ah.</p>
<p>Miyuu tuugu maamulayaa lambarkaaga taleefanka ama koontada?</p>	<p>La xariir shirkada simikaarka si ay kuugusoo cusboonaysiiso lambarka taleefankaaga. Markaad la xariirto, badal baasweerka ciwaankaaga. Sidoo kale hubi kaarkaaga daynta, baanka, iyo koontooyinka kale ee dhaqaalaha si aad uga fiiriso lacago sharci daro ah oo lagala baxay ama isbadelo lagu sameeyay. Haddii aad aragto wax, u sheeg shirkada ama xarunta. Kadibna booqo IdentityTheft.gov si aad u aragto tallaabooyinka aad qaadi karto.</p>

U sheeg Tuugada lagu gaystay FTC

Marka aad tuugo ku wargeliso, FTC ayaa u adeegsan karta xogta inay dhisto kiisas ka dhan ah tuugada, la socoto falalka xiga, ayna ka wacyi geliso dadwaynaha, ayna xogta ku saabsan waxa dhacay la wadaagto bulshadaada. Haddii tuugo ku dhacday — ama aad aragtay tuug, ku wargeli FTC oo aad ka helayso [ReportFraud.ftc.gov](#)



FEDERAL TRADE COMMISSION

Oktoobar 2022

Waxaad ka fiirin kartaa waxa ka socda gobalkaaga ama aagga bartamaha adoo booqanaaya

[ftc.gov/exploredata](#)